Waxaa jira dhowr xaaladood oo aan ku xakaamayno bey'addeenna. Laakiin Cimilada, kulaylaha badan, waxa aan samayn karno waa falcelis/jawaab. Saamaynta liddiga ee kulaylka uu keeni karo waa jirroyin culus, iyo-kaca halista dabka.

Xilliyada abaarta waxay qayb caadi ah ka mid yihiin cimilada Minnesota, iyo muddooyinka abaartu socota oo aan la saadaalin daraja kasta ee la hubo. SanadkiiI 2004, 90 reer Minnesota ah aya lumiyay dhismahoodi iyo wixii ay lahaayeen sabab ka timid dabka hillaaca. Lixdan-iyo-labo dabka hillaaca waxay ka dhaceen guryo habab ganacsi, iyago sababay waxyeello ah $2.7 milyan.

Si kastaba ha ahaatee, waxa jira ka taxaddarid gaara oo la samayn karo si loo hubiyo ammaanka qoyskaada iyo hantidaada inta lagu jiro xaaladaha xilliyada kulaylaha iyo hawada qallalan.

Luulyo, 2006, ayaa Luuliyada ugu kulul ka ahay Twin Cities tanyo 1935 oo noqotay tii saddeexaad ee u kululayd.

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

Waxa quseeya aamaanka xilliyada kulaylka/qalalyka

Laga hortago kulayka

WAA MAXAY TUSMADA KULAYLKA?

Tusmada kulaylka (HI) waa heerkulka ka dhacay jirka aadana oo lagu daray saamaynta heerkulka iyo umiitada. Dad badan waxay fahamsanyihiin marka uu heerkulku kor u kaco, tusmada kulaylka uu kaco. Laakiin waa maxay sababta ay hawada umiitada dowr uga ciyaareysaa? Sababta waa dhididka oo aan uumi bixin karin marka hawada uumigu sarreyso. Sidaas darted, qaboojinta waxay saamaynaysaa dhididka oo yaraanaya marka hawada qoyani ay kacdo, iyo jirkaada oo aan awoodi karin in uu caadi ahaan is qaboojiyo.

WAA MAXAY MACDANTA LA XARIIRTA KULAYLKA?

Heerkulka xad-dhaafka wuxu sabibi karaa halis, keeni karo dhibaato caafimaad oo loo dhiman karo. Si kastaba ha ahaate, dadka way ka hortagi karaan jirrooyinka kulaylka la xariira adigoo is qaboojiya iyo caba biyo badan.

Jirroyinka la xariira kulaylka waxa sabab u ah guud ahaan jirka oo awoodi waaya in uu is-qaboojiyo. Marka qaababka xakamaynta heerkulka jirka ee dhididka iyo wareegga oo culays badan fuulo, ama mar jirku aanu soo celin karin dhecaamada iyo milax ka lumay oo dhididka raacay, heerkulka dhumucda jirka hoose waxay bilowadaa inay soo kacdo.

Halista ugu badani waa shaqsiyaadka waayeelka iyo dadka horay u qabay iyo xaalado caafimaad oo daran. Waxa lagula talinayaa dadka booqanaya qoysaska nugul iyo saaxiibbada inta badan waqtiga cimiladu kulushahay in iska hubiyaan qaadista tallaabo habboon si looga gaashaanto neefsiga qaaca, kulayl kugu dhufta ama jirroyin kale – ee la xariira kulaylka.

Si kastaba, xita shaqsiyaad dhallinyaro caafimad qabta ayuu dhibku ku dhici karaa. Labada nooc ugu weyn ee jirrooyinka horay uu jiray ee la xariira kulaylka. Qaaca kulul ma aha mid nafta cabsi galinaya, ku dufashada kulaylka ay dhimasho keeni karo.

Calaamada digniinta hore ee kulaylka qaaca waxa ku jira tamarta oo hoos u dhacda, xiisaha cuntada oo yaraata, daciifnimo, madax-xanuun iyo lalabbo yar. Dadka caalamadahaas leh waa inay raadsadaan meel qabow, cabaan dareere badan, iska bixiyaan dharka saaidka ah iyo inay nastaan. Cadaadiska kulaylka ka dhasha wuxu u baahanyahay fiiro gaara, laakin ma laha daaweyn deg-deg ah.

Caalamadaha culus oo tilmaamaya in loo baahanyahay daaweyn deg-deg ah iyo fiiro gaara waxa ku jira, wadna-garaac badan, madax-anuun garaacid leh, xabad xanuun, maqaarka oo qallala, is-dhex-yaac xagga maxkaxda, cun-cun, matag, shuban, murq go', dhac-dhacid iyo neefsashada oo dhibta. Wixi de-degga, waca, 911, geeh qofka cadaadiska kulaylku hayo meel qabow, kana bixi dharka siyaadada, biyo ku firdhi oo babbi inta uu gargaarku ka imaanayo.

WAXYAABAHA QUSEEYA AMMAANKA DABKA



- Gaarigaada ha ku wadin meel caws qallalan leh oo marna halkaas ha istaajin.
- MARNA wax qaacayaa ha ka tuurin daaqadda gaariga, shidan ama aan shidnayn.
- Oolyee gaari-jiidka lugaha, hubi lugaha, oo hubi silsiladaha ammaanka inaysan dhulka taabanayn.
- Waxyaabaha guban-og ee ku jira motoorka gudahiisa gawaarida wadda kasta mara, dhuxusha celiya waxay u baahanyihiin oggolaaashaha federaala.
- Baar oo nadiifi dhimbil celiyaha.
- Ku qaado gaarigaada yaambo iyo dab-damiye OHV/ATV.
- Marna ha ku ciyaarin kabriid, dareere guban-og, sigaar-shide iyo dab kasta.
- Bar saaxiibbadaada waxa ku saabsan ka hortagga dabka.
- Ogow nidaamka gubashada guriga dibaddiisa ee degmadaada oo marna ha u gubin qashinka si sharci darro ah.
- Kormeer xeradaada marka aad ka tegaysid si loo hubiyo in xeradu aanu dab oolin.
- Marna qori gubanaya dabka ha ka qaadin.
- Marna ha ku isticmaalin nooc kasta oo rash ah xaalado qallalan.
- Ku kaydi dareeraha guban-og weelal si hagaagsan u daloola, sare iyo meel aanay caruurtu gaarin.